

SHARCI - Lamb. 41 ee 1 Juun 1972

WAX KA BEDDELID XEERKA CIQAABTA

**MADAXWEYNHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

KADIB markii la arkay AXDIGA KOWAAD iyo AXDIGA LABAAD ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969kii;

KADIB makii la aqoonsaday aqbalidda Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA:

Sharcigaan hoos ku qoran:

Qod. 1

Qodobka 259 ee Xeerka Ciqaabta oo lagu ansixieyey Dekreetada-sharci lamb 5 ee 16 Diseember 1962 waa la beddeley waxaan loo aqrin doonaa sida soo socota:

Qod. 259

Dayicidda shaqsiyeed ee xafiis ama adeeg ama howl dowladeed

1) (a) Sarkaalka dowladeed (240/a), shaqsiyaadka u xilsaaran adeeg dadweyne, qofka haaya howl dowli ah ama nafac dadweyne leh (240/c), oo aanan loo abaabulin sidii hey'ad ama hoos timada hey'ad u adeegta danta dadweynaha, oo isaga dhaqaaqa xafiiska ama adeega ama shaqada isagoo dantiisu tahay in qalqal la geliyo habsami u socda howlahaas, wuxuu mutesan doona xariga (6) ilaa 6 bilood iyo ganaax (97) ilaa Sh.So 5,000;

(b) Haddii ujeeddada dayicaaddu tahay mid ah ka dhuumasho' shaqo, adeegga ama dacayacaad 'ciqaabtu waa xarrig 2 ila 5 sano.

2) Isla ciqaabtaasi waxaa mutesan doono qofkii isagoo ujeedadiisu tahay sida ku tilmaaman (a) isagoo dayiciin xafiiska, ama adeega iyo shaqada u hagrado si uu qalqal u geliyo habsami u socda iyo nidaamka howsha;

3) Ciqaabta sare ku xusan waxaa lagu kordhin doonaa ilaa 3 u dhig kala bar haddii falkaasi ay uga timaado dadweynaha ama shaqsiyaadka (260) ama qof lagu tilmaamaay faqradda laad, uu galo falalkaasi ku tixan sharcigaan isaga uu u dhoofay dibadda ama ku sugan howl uu ka haayey dibedda dalka;

4) Sharcigaani wuxuu ku tilmaami doona 'shaqo ka-dhuumasho' qofkii ka dhaqaaqada xafiiska, adeega ama howsha loo xilsaaray isagoo fassax u haysanin. Waxaa lagu micneyey 'shaqo howl dibedeed, ciddii si joogta ah ama si ku meel gaar ah u sugan dalka dibediisa.

Qod. 2

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa taariikhada lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqratiga ee Somaliya.

Sharcigaani waxaa lagu keydin doonaa Keydka shuruucda iyo dekreetoyinka ee Jamhuuriyadda.

Cid kasto waa in sharcigaan ay u hoggansanaato loona hoggamiya cid kasto.
Muqdisho, 1 Juun 1972.

Madaxweynaha
Golaha Sare ee Kacaanka
Sareeye Guuto Mohamd Siyaad Barre